

Mustaqbalo  
fiican

Qoraal kooban oy diyaariyeen  
Madaxdu oo kusaabsan istiraatiijiyad  
loogu tala galay dadka da'yarta Haringey  
ee jira 11-19

**Mustaqbalo fiican “Bright Futures” waa istiraatiijiyad loogu tala galay in sare loogu qaado guulaha waxbarasho ee da’yarta u dhaxaysa 11-19 ee kunool Haringey. Waxaana istiraatiijiyada loo qaybiyay shan qaybood:**

- **Da’yarta kunool Haringey “Young People in Haringey”**
- **Waxbarashadda iyo waxbarista Haringey dhexdeeda “Learning and Teaching in Haringey”**
- **Madaxa Haringey “The Haringey Leader”**
- **Waalida iyo Bulshadda Haringey “The Haringey Parent and Community”**
- **Iskoolka Haringey “The Haringey School”**

“Ulajeedadanadu waxay tahay sare uqaadid guulaha iskooladda, gaadhista kalsoonidda bulshooyinka ku dhaqan xaafadaha, sari uqaadista fursaddaha nolosha ee caruurta iyo da’yarta xaafadda, wax ku kordhinta wanaaga iyo wadajirka bulshadda xaafadda iyo in lahelu xarumo kuyaala caasimadda ey suuro galka tahay in isku dhig arinkan laga sameeyo. Waxaan rabnaa inaan sare usii qaadno heerarka xilna iska saarno sidii caruurta iyo da’yarta oo dhan looga qayb galin lahaa. Waxaan aaminsan nahay inay arinkan mutaystaan.”

**Si ulajeedadan loo gaadho, waxaan mar kale ku celinaynaa inay naga go’an tahay inaan dadaal dheeraad ah galinaa sidii aan usamayn lahayn wada shaqayn adag oon arinkan kala samayno dhamaan dadka daneeya mustaqbalka caruurta iyo da’yartaba.**

Waxaa intaas oo dhan ka muhiimsan inaan rabno:

- Inaan marka ugu danbaysa jabino xidhiidhka u dhexeeya hoosu dhaca tacliinta iyo awood yari dhaqaalaha qoyska uu ardaygu kayimid, waxaana samaynaynaa sidii loo gaadhi lahaa horumar, is dhexgalka uwaara bulshooyinkan qarnigan 21 aad;
- Inaan gacan kagaysano sidii dugsiyadda sare ay u gaadhi lahaayeen heerarka ugu sareeya, oy u noqon lahaayeen kuwo si fiican u habaysan, ardaydana ugu abuur lahaa dhiirigalin si ay waxbarashadda meel sare ooga gaadhaan sarana u qaadaan, sanaanta iyo is dhexgalka bulshadana ka qayb qaata.;
- in saamayn lagu yeesho natiijooyinka kuwa ubaahan caawinta;
- In dugsiyadda sare loo suuro galiyo inay kaalin muhiim ah ku yeeshaan qorsheyaasha horumarinta xaafadda iyo qorsheyaasha kale ee gacan kagaysan sare uqaadista xaaladda da’yarta;

- inaan wada shaqayn kala yeelano dhamaan qaybha daneeya mustaqbalka caruurta een wada shaqaynta leenahay sidii fursaddaha ugu fiican ee suuro galka ah loogu soo gudbin lahaa caruurta iyo da'yarta; iyo

- in maalgalin lagu sameeyo adeegyadda caawiya caruurta da'yarta ah

**Mustaqbalo fiican “Bright Futures” waxay u qaybsan tahay shan qaybood kuwaas oo dhamaantood saamayn ku leh isbadalo fiican.**

### **Qodobka 1:**

#### **Da'yarta kunool Haringey “Young People in Haringey”**

Waxaan aqoonsanahay oon dhiiri galinaa **kale duwanaanshaha, guulo sare kasoo hooyinta waxbarashadda iyo isk dhex galka** da'yarta Haringey, waxaan kale oon lasoconaa **caqabadaha ay leedahay inay caruurtu ku koraan xaafado dadku aad u kale gaadisan yihiin ee kuyaala Caasimadda.** Waxaan rabnaa inaan qorshayno mustaqbal u suuro galin caruurtu inay **sari u qaadaan himilooyinkoodda korna uqaada aqoontoodda waxbarasho.**

Waxaa kale oon rabnaa inaan **noqono hurmuudka codka dadka da'yarta,** uguna dhiiri galino inay noqdaan **muwaadiniin fir-fircoon,** kana qaybgalino go'aan qaadashadda iyo sifiican usaamaynta bulshadda.

#### **Natijjooyinka**

- Waxaan kaashanaynaa Istiraatiijiyada Wadashaqaynta Caruurta iyo Da'yarta, si aan u habsano in adeegyadu ay caruurta da'yarta u suuro galinayaan inay noqdaan kuwo caafimaadsan, sinabadgalino ahna u nool, jecel inay guulo gaadhaan, sifiicana wax usaameeya soo hooyana guulo dhqaale oo sare. Gaar ahaan, waxaa kaashanaynaa Golaha Xaafadda Caruurta sidii xil laysiga saari lahaa inay caruurtu noqdaan kuwa iskoolka inay joogaan dareemo nabadgaliyo.

- In ladhagaysto aragtiyadda da'yarta si loo habsadu in adeegyadda loo soo gudbinayo da'yarta ay yihiin kuwo lagu jaangooyay baahiyahoodda, gacana kagaysan inay gaadhaan guulo sare nabagaliyadoodana loo habsan lahaa.

- In lasameeyo Baarlamaanka Da'yarta ayna doortaan Gudoomiya da'yar si kor loogu qaado fursadaha dhamaan caruurta oo dhan ay si fiican saamayn ugu yeeshaan bulshadda.

- In lasameeyo iskaashi adag oo wada shaqayn sarana loogu qaado loona siiwado fursadaha da'yarta loona soo gudbiyo qalabyada ku haboon ee ugu fiican.
- In sare looqaado sidii da'yartu iskool uheli lahaayeen macluumaadka iyo talooyinkaba.
- In maalgalin lagu sameeyo qaybta Adeegyadda Dhalinyarta Haringey si adeegyadda ay usoo gudbinayso dadka da'yarta ah sare loogu qaado.
- In si aad ah sare loogu qaado fursaddaha ay da'yartu u helayaan isticmaalka tiknoolajiyadda casriga ah si ay u sahalnaato waxbarashadoodu macluumaad badan oo kacaawin inay qaataan go'aana fiicana ay ooga helaan isticmaalka tiknoolajiyadda casriga ah.
- In la sameeyo fursado badan oy da'yartu uhelaan farshaxanimadda iyo isboortiga si ay si buuxda ooga faa'iidaystaan fursadaha u furan ey ka heli karayaan caasimadda.

## **Qodobka 2: Waxbarashadda iyo waxbaristaa Haringey dhexdeeda (Learning and Teaching in Haringey)**

Waxaan rabnaa inaa samayno manhaj aad xiiso uleh kaas oo caruurta da'yarta ah dhiiri galin si ay unoqdaa kuwa dareen fog leh oo waxbarashaddana niyad u haya, jecelna inay wax badan ogaadaan meel sarena gaadhaan, helaana khayraadka ku hagi waxbarashadooda.

Intaas waxaa dheer, waxaan rabnaa inaan samayno **shaqaale niyadoodu aad u sarayso** kuwaasoo dhiirigalin dadka da'yarta ah, taas oo dhisi hal abuur kooda sarena u qaadi waxbarashadooda.

### **Natiijooyinka**

- In waxbarashadda da'yarta Haringey ay noqto meesha laga duulayo lana soo buuxiyo baahiyahooda kale duwan. Waxaana arinkaas lagu gaadhi hirgalinta barnaamijyo kale duwan oy ku jiraan sare u qaadista isticmaalkooda tiknoolajiyadda casriga ah.
- Balaadhinta hawlaha bilawday ee kusaabsan inay caruurto si habsami ah ooga soo wareegaan heerka dugsiga sare ayaga oo ka imaanaya heerka dugsiga hoose, si xil laysaga saaro in dhamaan caruurta oo dhan ay u sameeyaan horumaro sanadda ugu horeeya ay bilaabaan heerka waxbarashadda iskoolka sare.

- Balaadhinta manhajka sahlan ee heerka 4 ilaa midka 3 (Key Stage 4 to Key Stage 3), gaar ahaan caruurta halista u ah inay waxbarashadoodu hoos u dhacdo isla markaana usuuro galiya inay gaadhaan siina wadaan heer sare oo waxbarashadooda laxidhiidha.
- In si aad ah loo balaadhiyo qorsheyaasha iyo goobaha waxbarasho iyo taba baro ee loogu tala galay caruurta u dhaxaysa 14-19, si caruur badani uu u xiiso galiyo waxay barten niyad fiicana u haya sidii ay waxbarashadooda ka danbaysa 16 ay usii wadi lahaayeen, amaba ay u heli lahaayeen tababaro ama shaqooyin u qalma.
- Qorshaha iskooladda la balaadhiyay (extended schools), inuu usoo gudbiyo saacado badan oo kabaxsan xiliga iskoolka ay helaan fursado waxbarasho, gaar ahaan caruurta fursaddaha waxbarasho ey guriga ku helaan uu yar yahay.
- Isticmaalka isboortiga iyo farshaxanimadda si ay u xiiseeyaan tababaradda farsamadda gacanta, ay u heli barnaamijyo kale duwan kuwaas hiigsanayo qorshaha Olbiga sanadka 2012 iyo Ciyaaraha Olumbiga.
- inay Haringey noqoto xarun heerkeedu sareeyo ee shaqooyinka, fulinta khibradda iyo kobcinta shaqaalaha, kaas oo ah in iskool kasta lahaado koox khubaro ah oo dhiiri galisa cadaysana qaababka fiican ee tacliinta iyo waxbarashadda.
- In tiknoolajiyadda casriga ah loo isticmaalo sare ugu qaadida waxbarashadda.

### **Qodobka 3: Madaxa Haringey “The Haringey Leader”**

Waxaan rabnaa inaan samayno **madaxdda aduunka** oo heerkeedu sareeyo kuwaas oo leh **dareen fog oo akhlaaqeed**, lehna awood inay **sameeyaan, bulshaduna** ku dayato marka laga tago iskoolka awoodna u leh inay qaab fiican bulshadda u hagaan, qaabkaas oo u suuro galin in **dadka kale ladhisaan iskaashi adag**.

#### **Natiijooyinka**

- In Haringey ay noqoto xarun heerkeedu sareeyo ee dhisidda madaxda iskoolka.
- In ladhiso madax bulsheed oo leh qaab madaxtinimo kuwaas oo bulshadda ku leh kaalin cad oo laxidhiidha kobcinta is dhexgalka iyo sinaanta qowmiyaddaha.
- In la adkeeyo qaabka iskoolku isu qiimayn si madaxtinimadda/hogaanka u noqoto arin si gaar ah loola socdo dhamaan heerarka waxbarasho oo dhan xoogana loo saaro horumarka waxbarasho ee arday kasta, isla markaasna baahiyihiisa loo soo buuxiyo..

- In ladhiso Golaha caruurta da'doodu u dhaxaysa 11-19 si loo diyaariyo fursado ay kula lixaabtamo dhamaan qaybaha daneeya mastaqbalka dadka da'yarta Haringey.

- In sare loo qaado qaabka tiknoolajiyadda casriga ah loo isticmaalo si ay gacan ooga gaysato maamulka iskoolka oogana qayb galiso arimaha ka dhacaya bulshadooda iyo aduunka oo dhanba.

## **Qodobka 4:**

### **Waalidka iyo Bulshadda Haringey “The Haringey Parent and Community”**

Waxaan dhiiri galinaynaa **iskaashi dhexmara waalidiinta/daryeelayaasha** si waxbarashadda caruurtu ay u noqon lahayd mid guulaysata caruurtuna u noqdaa kuwa **bulshooyinkooda iyo ururadooda** ku yeesha xidhiidh adag oo shaqo.

#### **Natijjooyinka**

- In caawin loo soo gudbiyo waalidiinta madaxta go'aana qaadata, ardayda kuwo soo gudbiya waxbarashadda iyo gudoomiyayaasha iskooladda.

- In sameeyo qorshaha ugu fiican ee waalidiinta looga qayb galin lahaa qorsheyaasha iskoolka.

- In kor looqaado waxbarashadda qoyska iyo waxbarashadda dadka waawayn ayada oo la isticmaali qorshaha kordhinta iskoolka.

- In waalidiin badan laga qayb galiyo golayaasha si ay wax oogu biiriyaan qorsheyaasha qiimanta adeegyadda, kuwaas ay kujiraan adeegyadda iskooladda, iskooladdana ka caawiyaan una hubsadaan in iskooladu ay soo buuxinayaan baahiyaha caruurta.

- In lacaawiyo loona suuro galiyo in iskooladda bulshooyinku ay leeyihiin ey kucaawiyaan caruurta bulshadooda iskooladaasna ay matalo Golaha ardayda da'doodu u dhaxaysa 11-19.

- In xil layska saaro sidii dadka da'yarta iyo qoysaskoodu ay u heli lahaayeen macluumaad, talooyin taylo oo kusaabsan arimaha ay kamid ah yihiin talooyinka shaqadda si ay go'aan doorasho fiican oo laxidhiidha shaqadooda iyo waxbarashadooda u dooran lahaayeen.

- In laxoojiyo fursadaha waxbarasho ee waalidka iyo bulshadu waxaana arinkaas lagu gaadhi in la kordhiyo saacadaha uu iskool kasta furnaan.

## **Qodobka 5: Iskoolka Haringey “The Haringey School”**

Waxaan rabnaa inaan sii wadno horumarka **arimaha muhiimka ah (asaasiga ah), ururka iyo deegaanka** ay iskooladu leeyihiin si ay gacan ooga gaystaan isbadalka waxbarashadda ku dhacay qarnigan 21 aad.

### **Natijoyinka**

- In ladhiso xarun cusub oo loogu tala galay foomka lixaad lagana dhiso bariga dagmaddan markay taariikhdu tahay bisha Sagaalaad ee 2007.
- In lagu sameeyo maalgalin muhiim ah sidii qorshayaasha waxbarasho ay u isticmaali lahaayeen tignoolajiyadda casriga ah.
- In dugsi sare kasta loo suuro galiyo inay kordhiyaan oy badiyaan saacadaha ay adeegyadda soo gudbiyaan (waxtiyadda ay furan yihiin).
- In hoos loo dhigo qaabaka ay wax u aqbaala iskooladda kuyaala bariga dagmadda si si fiican oogu soo buuxiyaan baahiya badan ey leeyihiin dhalinyarta ay u adeegaan.
- In labilaabo samaynta “qodobada muhiimka u ah inay iskooladda oodhan guulaystaan, lana sameeyo xarumo waxbarasho oo u furan ardayda oo dhan.
- In dhamaan iskooladda oo dhan lagu daro heerarka qorshaha BSF.
- In ladhiso iskool cusub oo la furo bisha Sagaalaad ee sanadka 2009 kaas oo loogu tala galay ardayda fasalka 7aad.
- In marka lagaadho sanadka 2008 dhamaan iskoolada loogu talagalay ardayda leh baahiyaha waxbarasho ee gaarka lagu daro iskooladda caadiga ah.
- In dhamaan iskooladda sare loo sameeyo qol hoos yimaada looguna tala galay caruurta leh dhibaatooyinka laxidhiidha waxbarashadda.
- In xil layska saaro in deegaanka waxbarashada ee dugsiyadda sare uu yahay mod caawinaya caruurta leh dhabaatooyinka laxidhiidha aragtidda.
- In iskoolada sare laga sameeyo goob caawin siisa ardayda leh dhibaatooyinka laxidhiidha dabeecadaha iyo qiiradda si ay u helaan caawimaad kale duwan.
- In la kobciyo qorsheyaasha caawinta siiya ardayda leh dhibaatooyinka badan ee laxidhiidha waxbarashadda, si khubaraddu ay usoo gudbiyaan caawin heerkeedu sareeyo ayday ayna markaas tiradoodu badnayn.

- In labadiyo tiradda iyo baaxadaha khubaradda joogda dugsiyadda sare ee Haringey, loona sameeyo qalab ay iskooladda kale duwan ay wadaagi karayaan.
- In lasameeyo ilaa labo xarumood oo tababar si ay ugu adeegaan diyaarinta macalimiinta cusub iyo tababaradda dheeraadka ah ee markasta lasiiyo macalimiinta.
- In lasmeeyo xarun loogu tala glay dhalinyaradda iyo xarunta amaal marinta Boqorka Edinburgh.

Si shantaas qodob ee kor kuxusan ay u hirgalaan waxaan diyaarinay qorshe balaadhan oo siyaasadeed oo waxqabad kaas oo taaban qodobadan hoos kuxusan:

- Taargadyadda iyo heerka waxbarasho ee iminka jira
- Inuu manhajku soo buuxiyo baahiyaha dadka da'yarta ah
- In wax laga qabto hoos u dhaca waxbarasho
- Halku dhago waa: Ilma kasta waa muhiim: waa in caruurta isbadal lagu sameeyaa
- Isku dhex darid
- Qorsheyaal kale duwan oo iskoolku leeyahay
- Tikonoolajiyadda casriga ah
- Qorshaha habsami u shaqanta iyo siiwadida tababaradda iyo horumarka
- Tayadda hogaanka Haringey dhexdeeda
- Inay jiraan qodobo xusayay sida guulaha loo gaadhay, lasocod joogta ah iyo qiimayn

**Haringey waxay leedahay aragtiyo cad, hogaan adag waxaa intaas dheer in dadka aan wada shaqaynta leenhay inay yihiin kuwa shaqadooda u go'an. Waxaan soo diyaarinay qorshe balaadhan si isbadal u yimaado. Waxaan leenahay awood iyo waxqabad noo suuro galin inaan gaadhno guulo badan, si aan caqabadaha waxbarashado xumidda u dhamayno sarana u qaadno natiijooyinka iyo guulaha ay gaadhaan dadka da'yarta ah een u adeegno.**

**Nuquladda ah qoraalkan oo kooban ama isagoo dhamaystiran waxaa laga heli karaa:**

Wendy Quildan or Thelma Austin  
General Office  
1st Floor  
48 Station Road  
Wood Green N22 7TY

020 8489 3893 / 3238

**emailka:** [wendy.quildan@haringey.gov.uk](mailto:wendy.quildan@haringey.gov.uk)  
ama [thelma.austin@haringey.gov.uk](mailto:thelma.austin@haringey.gov.uk)

boga intarnedkuna waa:  
**[www.haringey.gov.uk/brightfutures](http://www.haringey.gov.uk/brightfutures)**

Qaybta Adeega Caruurta  
December 2005

© Kawnsalka Haringey 2005